XAFIISKA AGAASIMAHA
Kate Brown, Gobanatoore

Oregon Health Authority

500 Summer St NE E20
Salem OR 97301
Codka: 503-947-2340
Faakiska: 503-947-2341

Taariikhda Dhaqangalka: Diseembar 3, 2020

Hagida Waaxda – Dukaamada Tafaariiqda

Maamulka: Amarka Fullinta Lambarka 20-66, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

Khusaynta: Hagidaan waxay quseysaa gobolka oo dhan ee dukaamada tafaariiqda, oo ay ku jiraan laakin aan ku xadidneyn, dukaamada bagaashka, dukaamada ku haboon, bandhigyada ganacsiga, bandhigyada RV/baabuurta, suuqyada beeraleyda, suuqyada gudaha iyo banaanka, goosashada beeraha, iibinada tafariiqda waynta, maktabadaha iyo farmashiyada.

Hirgelinta: Ilaa iyo xad hagidaan waxay u baahantahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waxaa lagu fullin karaa sida lagu qeexay Amarka Fullinta Lambarka 20-66, sadarka 10.

Qeexitaano:

- “Dhadhaminta Khamradu” waxay ka dhigan tahay wax aan ka badnayn 1/2 wiqiyadood oo khamro la sifeeyey, 1½ wiqiyadood oo ah khamri/casiir tufaax, ama 3 wiqiyadood oo ah khamriga heedda ka samaysan.
- “Suuqa Beeraleyda” waxaa loola jeedaa beeroolayaal koox ah oo dadwayne ah oo meel ku kulma iyaga ama wakiiladooda kuwaasi oo ujeedadooda koowaad tahay inay toos uga iibiyaan cuntada ama waxyaalaha kale ee beeraha ka soo go’a macaamiisha, taasoo ay kujiraan laakiin aan ku koobnayn waxsoosaarka, badeecada duban, hilibka, ukunta, ubaxyada, malabka iyo waxyaabaha caanaha laga sameeyo.
- “Suuqyada gudaha iyo kuwa furan” waxaa loola jeedaa barxado dadwayne oo gudaha ah ama dibadda ah halkaasi oo ujeedada koowaad tahay in iibiyeyaashu ku iibiyaan waxsoosaarka beeraha, cuntada, alaabaha ganacsi, iyo adeegyada, guud ahaan iyagoo adeegsanaya cooshado ama miisas, iyadoo ganacsataduna ay bixinayaan khidmad kaqaybqaadasho. Suuqyada gudaha iyo kuwa dibadda ee furan waxa kamid noqon kara balse kuma koobna suuqyada beeralayda, suuqyada alaabta mustacmalka ah, carwooyinka farsamada, wax ku iibinta waddada dhinaceeda iyo suuqyada kale ee aysan kujirin gaadiid raacida ama bandhigyada madadaalada. Suuqyada gudaha iyo kuwa dibadda ee furan kuma jiraan suuqyo laga dukaameysto ama xarumo ama moolal ganacsi.
- “Ku-isticmaalidda goobta gudaheeda” waxaa loola jeedaa iibiyeyaal hal ama ka badan oo kaqaybqaadanaya suuqa gudaha/dibadda ee furan kuwaasi oo iibiya cunto ama sharaab lagu isticmaalayo suuqa dhexdiisa kuwaasi oo ah wax ka badan muunad ama xajmiga dhadhaminta khamriga.
- “Hawlwadeen” waxaa loola jeedaa qof ka mas’uul ah maareynta iyo hawlgalka barxadaha suuqa gudaha ama dibadda..

- “Muunad” waxaa loola jeedaa saddex wiqiyadood ama ka yar oo ah cunto ama sharaab caadi ah oo aan ahayn aalkolo.
- “Gade/Iibiye” waxaa loola jeedaa ganacsi iibiya cunto, sharaabyo (uu ku jiro khamri), alaabo ganacsi ama adeegyo suuqa gudaha ama suuqa dibadda waxaana dhici karta inuu bixiyo ama aanu bixin khidmad si uu uga qaybqaato suuqa.

Dukaamada tafaariiqda waxaa looga baahan yahay inay:

- Dibu eegaan oo ay hirgeliyaan Habraaca hagista Gobolka oo Dhan ee Maaskaraha, Daboolka Wajiga, Gaashaanka Wajiga..
- Hubi in dhammaan shaqsiyaadka u hogaansamaan Hagida Maaskaraha, Waji Daboolashada, Daboolka Wajiga Gobolka oo dhan.
- Dib u eegaan oo hirgeliyaan Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada iyo Ururada.
- Ku xadey tirada ugu badan sida ku saleysan heerka loogu tallogalay halista oo wadanka oo dukaanka tafaariiqda ku yaalo.
- U hogaansamaan Hagida Howlgalada Usu Adeegida, haddii ay quseyso.
- U hogaansamaan Hagida Xarumaha Cunista iyo Cabitaanka ee heerka halista loogu tallogalay gobolka ee dukaanka tafaariiqda ku yaalo, haddii ay quseyso.
    - Goboladaa halista daran xir aagaga isticmaalka cuntada iyo cabitaanka gudaha iyo banaanka goobta, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidna qeybaha cuntada iyo aagaga fadhiga.
- Mamnuuc bandhigyada dhaxgalka iyo howlaha.
- Marka ugu horreysaba ku dhiirrigeli qaaba kale sida laamiga dhinaciisa.
- Dhaji calaamado waadax ah (ee laga heli karo healthoregon.org/coronavirus) ee qorayo aastaamaha COVID-19 , weydiinayo shaqaalaha iyo macaamiisha qabo aastaamaha inay guriga joogaan, oo qorayo cida lala xiriiro haddii ay u baahdaan caawin.
- Inay isticmaalaan calaamado si ay dadka ugu dhiirrigeliyaan inay jir ahaan kala fogaadaan.
- Inay si joogto ah u nadiifiyaan ugana dilaan jeermiska aaggaga shaqada, meelaha dadku ku badan yihiin, iyo sagxadaha badanaa la taabto ee aaggaga dukaanka ee macaamiisha/dadweynaha iyo aaggaga dukaanka ee shaqaalaha iyo aagagga bakhaarka alaabta. Inay tirtiraan gacan-qabsiyada albaabada qolalka dhar-beddelshada, darbiyada iyo kuraasta fadhiga kadib markuu macmiil isticmaalo.
- Inay hubiyaan in qalabka hawo-siintu si haboon u shaqeynayo. Inay kordhiyaan hawo qeybinta iyo hawo soo galista ilaa inta ugu badan ee suurtogalka ah iyada oo la furayo daaqadaha iyo albaabada. Barxadaha gudaha ah, marawaxadaha waa in la isticmaalo kaliya marka daaqadaha iyo albaabadu u furan yihiin dibadda si loo wareejiyo/qaybiyo hawada gudaha iyo ta dibadda. Ha furin daaqadaha iyo albaabada haddii ay taasi halis u keeneyso badqabka shaqaalaha ama macaamiisha.

Ilaa iyo xadka suurtogalka ah, dukaamada tafaariiqdu waa inay fiiro gaar ah u yeeshaan arrimaha soo socda, hase ahaatee waajib kuma aha:

- Inay fiiro gaar ah u yeeshaan inay walax caag ah oo la iska dhex arki karo ama muraayad hor dhigaan qofka lacagta qaadaya ama koontarada adeegga macaamiisha, ama meelaha kale ee aadka ay u adag tahay in masaafo ah lix (6) fiit ay kala fogaadaan shaqaalaha, iyo macaamiishu.
- Inay hirgeliyaan dariiq hal dhinac ah oo calaamado ku leh irridaha laga soo galo iyo kuwa laga baxo, hase ahaatee waxaa loo baahan yahay inayna xayirin irridaha ka-bixida ee loogu talagalay xiliyada dabka jiro. Inay isticmaalaan calaamado lagu hago socodka oo hal dhinac ah.
- Inay dhulka ku dhejiyaan calaamado iyo xargo ama sharootooyin si ay u joogteeyaan kala fogaanshaha jir ahaaneed marka ay dadku sugayaan qasnajiga qaabbilsan qabashada lacagta.
- Inay macaamiisha ka mamnuucaan inay isku cabbiraan waxyaabaha wajiga lagu xirto (maaskarooyinka dharka laga sameeyay, masarada, duubka madaxa lagu xirto, waxyaabaha indhaha lagu xirto).
- Haddii qolalka dhar isku tijaabinta loo furayo macaamiisha, waa inay ku dhiirigeliyaan macaamiisha inay gacmaha dhaqdaan ama isticmaalaan gacmo nadiifiye kahor iyo kadib marka ay isku tijaabiyaan dharka. Ganacsadayaashu dukaamada tafaariiqda waa inay siiyaan dadka gacmo nadiifiye ama ay goobo gacmo dhaqasho ka sameeyaan agagaarka qolalka dhar isku tijaabinta.
- Inay isticmaalaan qaababka lacag bixinta aan taabashada laheyn ama aan kaashka aheyn, kuwaasi oon khasbayn taabashda macaamiisha.
- In albaabada laga soo galo ay dhigaan gacmo-nadiifiye (kaasoo boqolkiiba 60-95% ka kooban aalkulo).

Habraac hagitaan oo dheeraad ah kaasoo khuseeya Suuqyada Xiran iyo kuwa dibadda ee Furan

Hawlwadeenada suuqyada gudaha iyo kuwa dibadda ee furan waxaa looga baahan yahay inay:

- Wixii ku isticmaalka cuntada iyo cabitaanka goobta ah, u xilsaar oo qeex aag suuqa kaliya ee ujeedadaan oo ku xadee tirada ugu badan ee aaga loogu tallogalay si aad ugu hogaansantid Hagida Xarumaha Cunista iyo Cabitaanka ee heerka halista loogu tallogalay ee gobolkaan.
    - Sharuuda dheeraadka ah ee gobolada halista sareyso ku jiro: xir aagaga isticmaalka gudaha iyo banaanka ee goobta, oo ay ku jiraan laakin kuma xadidna qeybaha cuntada iyo aagaga fadhiga.
    - OHA waxay si xoogan ugu talinaysaa in aagga si gaar ah loo sooco ama loo asteeyo si loo sameeyo hal albaab oo keliya laga galo iyo hal albaab oo keliya laga baxo.

    - Iibiyayaasha bixinayo isticmaalka goobta ee alkulada ama dhadhaminta alkulada ee suuqyada waa inay ka helaan shatiga dhacdada gaarka ah OLCC oo waa inay hubiyaan in weelasha furan ee alkulada (oo ay ku jiraan dhadhaminta alkulada, cabitaanada, iwm.) aysan ka tagin xaduudaha aaga shatiyeysan.

- Inay hubiyaan in macaamiisha, shaqaalaha iyo ganacsatadu joogteeyaan kala fogaanshaha jireed oo ah ugu yaraan lix (6) fiit qofkiiba, marka laga reebo in xubnaha isku kooxda ah ay wada joogi karaan iyaga oo aan kala fogaan lix (6) fiit. Waa in la joogteeyo masaafo ugu yaraan lix (6) fiit oo u dhaxeysa kooxaha.
- Inay dhajiyaan calaamado ay waajib kaga dhigayaan dadweynaha kala fogaanshaha jireed gudaha suuqa, taasoo ay ku jiraan laakiin aan ku ekayn aagaga wax cunista iyo xamaamyada agtooda.
- Inay isticmaalaan calaamado iyo xarko ama sharootooyin, ama tilmaamayaal kale oo muuqda, si ay u joogteeyaan kala fogaanshaha jireed marka la sugayo qasnajiga qaabbilsan qabashada lacagta.
- Inay hal (1) kormeere u xilsaaraan kala fogaanshaha jireed ee goobta 50-kii qofba si loo hubiyo in waqti kasta la joogteeyo shuruudaha kala fogaanshaha jireed iyo xadidaadda tirada isku-imaatinka goobaha gudaha suuqa xiran iyo goobaha dibadda ee furanlabadaba, taasoo ay kujiraan meelaha laga soo galo, meelaha laga baxo, musqulaha iyo aag kasta oo kale oo laga yaabo inay dadku ku kulmaan.
- Inay meesha ka saaraan ama xaddidaan aagaga ay dadku istaagaan si ay u hirgeliyaan shuruudaha kala fogaanshaha jireed ee ah in kooxuhu ay kala fogaadaan ugu yaraan lix (6) fiit.
- InaybBixiyaan xarumo kala gaar gaar ah, kuwaasoo ay kujiraan musqulaha, haddii uu jiro wax ka badan hal oo xiran ama mid furan oo isku waqti ka hawlgalaya isla meel.
    - Macaamiisha, ganacsatada iyo shaqaalaha suuqa waxa waajib ah inay isticmaalaan tasiilaadka suuqooda ama carwadooda loogu talo-galey oo kaliya.
- Inay u xilsaaraan ugu yaraan hal (1) ah adeegaha nadaafada kaasoo waajibkiisu yahay nadiifinta musqulaha saacad walba inta lagu jiro suuqa, iyo inuu hubiyo in aqabyada nadaafinta ku fillan yihiin (tusaale ahaan, saabuun, warqada musqusha, gacmo nadiifiye ka kooban 60-95% alkulo) inta lagu jiro hawsha oo dhan.
- Inay u xilsaaraan ugu yaraan hal (1) ah adeegaha nadaafada kaasoo waajibkiisu yahay inuu si joogto ah u nadiifiyo oo uu jeermiska uga dilo aagagga shaqada, aagagga dadka badan, iyo sagxadaha inta badan la taabto oo ah aagagga ay geli karaan shaqaalaha iyo macaamiishu.

Ilaa iyo intii suurtagal ah, <u>hawlwadeenada</u> suuqyada gudaha/kuwa dibadda ee furan waxaa looga baaahn yahay, hase ahaatee waajib kuma aha inay:

- Si xoogan ugu dhiirigeliyaan ganacsatada/kaqaybgalayaasha inay gacmahooda ku dhaqaan saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbiriqsi ama inay si joogta ah u isticmaalaan jeermis dillaha gacmaha (kaasoo boqolkiiba 60-95% ka kooban alkolo).
- Inay shaqaalaha iyo/ama iibiyayaasha siiyaan albaabo galitaan/ka bixitaan oo gaar ah.

Shuruudo dheeraad ah oo loogu talogalay <u>ganacsatada suuqyada</u> gudaha iyo kuwa dibadda ee furan:

- Haddii ay bixinayaan adeegyo shakhsiyeed, dib ha u eegaan oo ah hirgaliyaan Habraaca hagitaanka Adeegyada Shakhsiyeed.

Hagida dowladaha deegaanka

Dawladaha hoose waxaa looga baahan yahay inay ku dhaqmaan shuruudaha ku xusan habraacan haddii ay martigelinayaan ama qabanqaabinayaan suuq gudaha ah oo xiran ama mid furan kaasoo ay ka hirgelinayaan dhisme ay dawladdu leedahay ama hanti kiro ah, sida matalan goobaha lagu dhigo carwooyinka ee ku yaal koowntiyada ama magaalada hase ahaatee kuma koobna intaas uun. Dowladaha deegaanku waa inay u hogaansamaan habraacan jiheynta marka ay ay kireynayaan ama oggolaanayaan isticmaalka dhismayaasha dowladda ama guryaha ay dowladdu leedahay ama kireysato ee loogu talagalay howlaha aan dawliga ahayn.

Ilo dheeraad ah:

- Calaamado aad soo dhejin karto
- Habraaca hagista Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Waji Daboolada, Gaashaanka Wajiga
- Hagista Guud ee OHA ee loogu tallogalay Badrooniyada iyo Ururada

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, laanta OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama emailka COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.